



Heshiis Laba Dhinac ah.

Taariikh: 20/10/2022

Maanta oo ay taariikhdu tahay 20/10/2022, waxa halkan heshiis laba dhinac ah ku wada galay Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka Iyo Wacyigelinta ee Jamhuuriyadda Somaliland oo heshiiskan lagu tilmaami doono" Wasaaradda" iyo shirkada **Gorof Procurement and Logistics** oo heshiiskan lagu tilmaami doono" Shirkadda"

Labada dhinac waxay ku heshiiyeen Qodobaddan hoos ku xusan:

Shirkada Gorof Procurement and Logistics waxa ay balan qaadysaa in ay Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigelinta u dayactirto idaacadda taala wasaaradda ee Shiine ah (chine) taas oo fadhiday muddo dheer, heshiiskani waxa kale oo uu meesha ka saarayaan heshiiskii hore ee ay labada dhinac wada galeen kaas oo ku saabsanaa keenista Idaacad cusub oo nooceedu yahay solid state short wave 50KW oo dhameystiran .

Hawsha la qabanayo:

1. Qiimayn iyo baadhis ciladaha Transmitterka iyo Antenaha
2. Soo iibinita qalabka lagu dayactirayo
3. Diyaarinta engineer ka socda shirkadda BBEF
4. Dayactirka Transmitterka iyo Anteenaha
5. Tijaabinta Idaacadda
6. Ka hadashiinta idaacadda

A. Soo iibinta Alaabta lagu dayac tirayo ee ay farsamo yaqaanadda Radio Hargeisa iyo shiraddii sayamaysay idaacaddu is qaateen waa alaabtan hoos ku qoran:

S.no	Description 描述	Model 型号	Qty 数量	Unit price	Total
1	100kW PAQt Tube 电子管	4CV100000C	2	\$ 55,600	\$ 111,200
2	Curtain 薄膜电容	PF7.324.1 5002	1	\$ 2,800	\$ 2,800
3	Water Pump 水泵	GZ50-32- 160/2.2	2	\$ 19,600	\$ 39,200
4	Gain Control 自动增益控制	PF2.884.6 014	1	\$ 2,750	\$ 2,750
5	Power Amplifier Module 功放模块	PF3.619.6033100K W	10	\$ 1,500	\$ 15,000
6	PA Accessories 功放模块辅料		20	\$ 850	\$ 17,000
7	Audio processor 音频处理器	ORBAN 9300	1	\$ 18,400	\$ 18,400
8	IGBT	CM100D Y-24A	40	\$ 350	\$ 14,000
9	Switched-mode Power Supply 开关电源	NES-100- 24	1	\$ 150	\$ 150
10	Power switch control board 功率开关控制板	PF2.850.60 05	10	\$ 4,500	\$ 45,000
11.	Study of the newly proposed transmitter	Study/survey	1	\$ 96,000	\$ 96,000
12.	Shipping and Packaging Services			\$ 26,500	\$ 26,500
13.	Engineers and Technicians			\$ 30,000	\$ 30,000

14.	Commission \$ 30% of \$ 418,000			\$ 125,400	\$ 125,400
15.	Contingency			\$ 36,600	\$ 36,600
	Grand Total				\$ 580,000

B. Waxa kale oo ay ku heshiyeen labada dhinac marka la galiyo sparepartska xaga sare ku xusan in la soo iibyo/la hagaajiyo qalab kale oo Radio Hargeisa u baahan yahay sida:-

- a. Hagaajinta Studio heesaha. (N.B. Qarashka ku baxaya hagaajinta wasaaradda ayaa maamulaysa
- b. waxa kale oo shirkadda Gorof ku wareejin doontaa Surveygii amba studygii laga sameeyay idaacaddii Cusbayd ee markii hore la keenayay isla markaana hadda awood loo waayay xiligan maadaama idaacddu ahayd 100KW isla markaana Maraykan ahayd. Documentskan waxa wasaaradda loogu wareejinaya maadaama ay lacagtii qaranku ku baxday daraasaddan si ay Wasaaradda ugu noqoto raad raac mustaqbalka haddii loo baahdo in la soo iibsado.

C. Faahfaahinta lacagta ku baxaysa heshiiskan

- I. Dayactrika Idaacadda: oo isugu jira alaabta lagu dayactirayo idaacadda oo ah alaabta ku xusan shaxda share ee heshiiskan, noolka iyo backagingka alaabta, iyo farsamo yaqaanadda hagaajinaya idaacadda .Qiime \$ 480,000.
- II. Hagaajinta studio radio Hargeisa .Qiime \$ 24,000. (Lacagtan \$ 24,000 ah waxa maaulaysa Wasaaradda)
- III. Daraasadda(Survey) iyo qiimeynta transmitterka iyo Antenaha oo la sameeyey.Qiime \$ 96,000 ,

D. Shuruudaha iyo qodabada heshiiska

1. Waqtiga heshiiska

Heshiiskan wuxuu ka bilaabmayaa 20/10/2022 waxaana soconayaa muddo lix bilood ah oo ka soo bilaabmaysa tariikhda heshiiska la saxeexo.

2. Hubsashada alaabta

Wassaraaddu waa inay alaabta iska hubsataa muddo dhan toban cisho marka ay shirkadda ka wareegto, haddii mudadaa ku hubsan weydo alaabtaas in la hubiyey ayaa loo qaadanayaa.

3. Keenista alaabta

Alaabta dayctirka waxa shirkadda laga dalbanayo ee BBEF ku sameynaysaa muddo 90 cisho gudahood ah ,alaabta waxa la soo rarayaa 15 cisho gudahood marka lacagta 50% la diro.Masuuliyadda alaabta markay soo gaadho dekadda ama Airportka waxay ku wareegaysaa wasaaradda.Sidoo kale wasaaraddu iyadaa ka masuul ah ka soo saaridda kastamka(custom clearance))

4. Hawsha Dayactirka

Shirkaddu iyadoo kaashanaysa Engineerada BBEF waxay dayctir ku sameynaysaa Transmiterka iyo Antenaha ,goobta lagu dayactiraya waa Radio Hargeysa gudhiisa,haddii ay Engineerada BBEF u suuro geliweydo inay yimaaadaan sababo la xidhiidha caqbadaha COVID19 ee ka jira shiinaha.waxay dayctirka lagu samyenaya remote guidance(hab durugsan) iyadoo la isticimaalayo (comprehensive inspection manual) isla markaana Engineerada idaacaddu la tashanyaan engineerada BBEF. Sababo la xidhiidha ta remote guidanceeka loo isticmaalayaa waa iyadda oo xiligan imika lagu jiro China uu saaray xayiraada covid.19

5. Qiimaha lacagta heshiiska

Qiimaha lacagta heshiiska guud waa 600,000(lix boqol kun oo doolarka maraykanka ah) oo kala ah \$ 480,000 kicinta iyo dayactirka idaacadda, keenis agab, Khidmadda shirkadda iyo khuburuuba, \$ 96,000 oo ah lacagtii ku baxday daraasadda idaacaddii cusbayd ee laga noqday iyo \$ 24,000 oo ah hagaajinta studiowga heesaha oo ay maaulayso wasaaraddu . Miisaaniyadda loogu talo galay mashruucan dayactirka idaacaddu waa

- (i) Lacagta lagu soo iibinayo qalabka idaacadda galaya oo dhan (ii) Lacagta noolka ee alaabta lagu soo qaadayo- (diyaarad ayaa la soo saarayaa si wakhtiga loo yareeyo haddii ay suurogal noqoto), (iii) hagaajinta studiowga heesaha oo ay maaulayso wasaaraddu, (iv) lacagta lagu keenayo khuburadda hagaajinaysa idaacadda iyo khidmadooda (vi) Khidmadda Shirkadda

6. Qaabka lacagta loo sii daynayo: Lacagta waxa loo sii daynayaa sidan hoos ku qoran:-

- i. \$ 300,000 oo dhiganta 50% lacagta heshiiska (Lacagta 96,000 waxa leh bangiga oo horumarin ah lagana sii qaaday xilgii daraasadda idaacadda cusub la waday)
- ii. \$ 180,000 oo dhiganta 30% lacagta heshiiska marka alaabta la keeno
- iii. \$ 120,000 oo dhiganta 20% Marka hawsha la dhamaystiro ee idaacadda la kiciyo isla markaana ay hawada gasho

7. Warbixinaha iyo Wargalinta

Shirkaddu waxay Wasaaradda Warfaafinta, la socod siin doonta kolba heerka ay marayso hawshu.waxayna u gudbin doontaa warbixin laba todobaadle ah.

8. Xidhiidhka dhinacyadda.

Shirkadda Gorof waxay shaqo u qabanaysaa wasaaradda warfaafinta, dhaqanka iyo wacyi galinta waana qandaraaslahu mashruucan lagu kicinayo laguna dayactirayo idaacadda radio Hargeisa wixii hawl qabasho ah waxa loo raacayaa heshiiskan iyo lifaaqyaddiisa waxaana loo maamulayaa sida lagula heshiiyay wasaaradda. Sidoo kale Wasaaradda warfaafinta, dhaqanka iyo wacyi galintu waxay hawshan u xilsaartay inay hagaajiyaan shirkadda Gorof wixii masuuliyad ah ee dayactir iyo hagaajin ahna shirkadda ayay ku wareejisay.

9. Wakiiladda. Wasaaradda iyo shirkadda Gorof

Waxay magacaabayaan laba masuul oo lagala xidhiidho hawsha la qabanayo si loo wada socdo loona dhawro in la shaqadda sideedii loo qabtay loona raacay heshiiska sidiisii haddii labada dhinac mid ka mid ahi amba labadooduba bedelayaan cida hawsha u xilsaarnayd hab qoraal ah ayaa la marayaa laguna sheegayo masuulka la bedelay iyo ka lagu bedelayba.

10. Gudbinta xogaha

Xogaha ku saabasan hawshan waa mid la ilaalinayo, wasaaraddu waa in ay siisoo wixii macluumaa ah ee looga baahan yahay hawsha qabashadeeda sida liistadada alaabta loo baahan yahay-list of spareparts, qoraaladda idaacadda la soo raaciyyat-manuals, iwm. Shirkadda Gorof waxay xaq u lee dahay inay wasaaradda ka hesho wixii macluumaa ah ee ka caawinaya hashan qabashadeeda.

11. Lacag bixinta

Lacagta wasaaraddu waxay u bixinaysaa hal mar marka heshiiska la sexeexo, lacagtana waxay ku shubaysaa accountka shirkadda GOROF faahfaahintiisuna tahay

Magaca Banigiga: Dahabshiil Bank International

Magaca shirkadda: Gorof procurement and Logistics

Nooca xisaabta/Account Type: 81105

Lambarka Xisaabta-/Account: Account No: 1021121254

Aqoonsiga macmiilka/Customer ID: 102024704

12. Laalista heshiiska

- a) Heshiiskan Wasaaraddu way laali kartaa (i) Haddii shirkaddu wadi kari waydo hashii ay balan qaaday inay qabanayso. Haddii Wasaaraddu laasho heshiiskan, Shirkaddu waxay ku dalacaysaa Wasaaradda wixii kharashaadka ah ee ku baxay hawsha intii heshiisku dhaqangalka ahaa
- b) Shirkadda Gorof way laali kartaa heshiiskan waxaanay ogaysiinasaa Wasaaradda haddii:
 - (i) Wasaaraddu awoodi waydo inay lacagta xawisho muddaddii heshiiska ku qornayd amba
 - (ii) Wasaaradda laga waayo iskaashi ku saabsan shaqadda la qabanayo

13. Dhowrsanaanta heshiiska(Confidentiality)

Labada dhinacaba waxay ilaalinayaan amba xafidayaa dhamaan wixii macluumaa iyo xogo ah ee ku saabsan hawosha marka laga reebo cida u xilsaaran labada dhinac ee ka wada shaqayna hawsha kicinta iyo dayactirka idaacadda

14. Xillinta khillafadka

a) Haddii wax khilaaf ahi yimaadaan amba in uun is faham-waa u dhexeeya labada dhinac waxa lagu xalilayaa isafgran-waagaa qaab wada hadal ah waxaana hawshaa xalilaya wakiilo ka kala socda wasaaradda iyo shirkadda Gorof. Waxa kale oo lagu Xlin karaa cid sadddexaad oo dhexdhedaad inay dhexgasho.

b) Haddii khilaafku sidaa ku dhamaan waayo waxa loo adeegsanay xeer nidaamyada garsoorka Jamhuuriyadda Soomaalilaaand.

FG: Waxa halka ku lifaaqan qorshe hawleedka lagu keenayo idaacadda oo todobaadle ah muddadaa lixda bilood ah.

Saxeexa Masuuliyiinta labada dhinac ee heshiiskan.


Dhinaca Wasaaradda

Magac: Salebaan Yusuuf Cali

Xilka: Wasiirka W/Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyi galinta

Saxeex: _____

Taariikh: _____



Dhinaca Shirkadda

Magac: Cabdikariim Maxamuud Diiriye

Xilka: Maamulaha Shirkadda Gorof Procurement and Logistics Company

Saxeex: _____

Taariikh: 30/10/22

